

Barnamijka Qiimo Dhimista Dayactirka Nidaamka Qulqulka Bulaacadaha ee King County.



Habka qulqulka bulaacadaha oo si fiican u shaqeeya wuxuu kaa ilaalin jeermiska!


Habka qulqulka bulaacadaha waa “hab yar oo lagu nadiifiyo biyaha wasakhda ah” oo ku yaalla daaraddaada gadaasheeda oo nadiifiya dhamaan biyaha wasakhda ee ka soo baxa gurigaaga – jikada, musqusha iyo goobta dhar dhaqa.

Sababta dayactirka uu muhiim u yahay:

- Lacagtuu kuu keydiyaa – Hada xoogaa lacag ah ku bixi dayactirka joogtada ah si aad hadhoow uga badbaadid lacagta badan ee ku baxayso hagaajinta ama bedelida habka qulqulka bulaacadaha oo hallaaba.
- Wuxuu ilaalin caafimaadka bulshadaada – jeermiska iyo fayrasyada khatarta leh ayuu ka ilaalin in ay gaaraan ceelasha, wabiyada iyo harooyinka deegaanka.
- Wuxuu ilaalin qiimaha gurigaaga – Habka qulqulka bulaacadaha oo aan la isticmaali karin wuxuu hoos u dhigi qiimaha suuqa ee gurigaaga wuxuuna kuu horseedi karaa maxkamedeyn kharash badan. Ogeysiinta iibsadaha in habka qulqulka bulaacadaha uusan shaqeyneyn waa waajib saran iibiyaha.

Ku bixi dayactirka sanadlaha ah ee bulaacada \$500 in ka yar marar-kale

Degmada King waxay bixinaysaa dhimis \$500 ah guri walba si loogu sameeyo koormeerka joogtada ah ee bulaacada, bangareynta, ama rakibidda tuuboyinka kicinta.



Lacag Kaydso oo Ilaali Nadaafada Biyaha Deegaanka

Si fiican u maamulida habkaaga bulacadaha, micneheedu waa inaad qaybtaada ka qaadanayso wanaajinta caafimaadka biyaha deegaanka iyo dhamaan noolaha ku dhex nool.

La xiriir pcrebates@kingcounty.gov si aad macluumaad dheeri ah u hesho!

Booqo www.kingcounty.gov/oss si aad u codsato dhimistaada maanta!